

Wax ku saabsan Mashruuca Asluubta Laga-warbixin karo

Qorshaha Mashruuca Asluubta Laga-warbixin karo ee Victoria wuxuu u baahan yahay in haya'daha qaarkood ay eedeymaha ku saabsan ku xadgudubka ilmaha iyo anshax xumada ilmaha la-xiriira oo ay ku sameeyaan shaqaalahooda ama tabaruceyaashooda usoo sheegaan Guddiga Caruurta iyo Dhalinyarada.

Mashruuca wuxuu ujeedkiisu yahay inuu hagaajiyo sida haya'duhu uga jawaabayaan eedeymaha ku saabsan ku xadgudubka ilmaha iyo anshax xumada ilmaha la-xiriirta.

Marka la raaco mashruuca:

- Haya'duhu waa inay ka jawaab celiyaan eedaymaha ku saabsan ku xad-gudubka ilmaha iyo anshax-xumada la xiriirta ilmaha oo ay sameeyaan shaqaalahooda iyo tabaruceyaashooda
- Haya'duhu waa inay u sheegaan Guddiga wixii ku saabsan eedeymaha
- Guddiga ayaa kormeeraya sida haya'dahu uga jawaab celiyaan oo ay u baaraan eedeymaha
- Haya'daha, sharci-dejiyeyaasha, booliska, Hubinta La-shaqeynta Carruurta iyo Guddiga ayaa wadaaga macluumaadka.

Haya'dahu waa inay wali usoo sheegaan hab-dhaqan kasta oo dambi noqon kara booliiska. Haddii booliisku ku lug yeesho, haya'daha waa inay wali baadhaan, Hase ahaatee ka dib oo keliya marka booliisku u sheegaan inay OK tahay in la bilaabo.

Noocce Asluubta ayaa laga warbixin karaa?

- dembiyada galmada ee ku lug leh ilmo
- anshax xumo ku lug leh ilmo
- rabshad jireed oo ku lug leh ilmo
- habdhaqan kasta oo ukeenta waxyeello shucuureed ama waxyeello cilmi-nafsi ilmaha
- dayacaad kasta oo ilmaha loo gaysto.

Ilmaha waxaa ka mid ah qof kasta oo ka yar 18 sano.

Wixii macluumaad dheeraad ah oo ku saabsan noocyada Asluubta laga warbixin karo, ka eeg [wax ku saabsan Mashruuca Asluubta Laga Warbixin karo](#) oo ku yaal website-ka Guddiga.

Yaa lagu dabaqayaa mashruucan?

Mashruuca waxaa lagu dabaqi karaa dadka soo socda ee ay la macaamilaan haya'daha qaarkood:

- shaqaalaha
- tabarucaha
- qandaraaslayaasha qaarkood
- xafiis hayeyaasha
- wasiirrada diinta
- saraakiisha haya'daha diinta.

Wixii macluumaad dheeraad ah oo ku saabsan haya'daha la sheegay, ka eeg [Haya'daha](#) ku yaal website-ka Guddiga.

Maxay yihiin waajibaadka haya'daha?

Madaxa haya'daha wuxuu sharci ahaan mas'uul ka yahay fulinta waajibaadyada hoos yimaada mashruuca. Madaxa haya'dda wuxuu noqon karaa:

- Sarkaalka Madaxa Fulinta
- Sarkaalka Agaasimaha ee haya'dda
- Xog-hayaha, haddii haya'ddu tahay Wasaarad Dawlada Victoria.





Haddii haya'ddu aysan lahayn CEO, sarkaal sare ah ama wax u dhigma, waxay u magacaabi kartaa mid. Foomkan waxaa loogu talagalay in lagu magacaabo [Magacaabidda madaxa haya'dda](#) oo ku qoran websiteka Guddiga.

Madaxa haya'ddu wuxuu u baahan yahay inuu:

- qaado tallaabooyin lagu ilaalinayo ammaanka caruurta
- hubiyo in haya'ddu leedahay habab loogu talagalay cabashada ama eedeeynta lagu sameyn karo.

Haddii aadan hubin qofka madaxda ka ah haya'dda, la xiriir Guddiga si lagu caawiyo.

Maxay tahay inuu qabto madaxa haya'ddu?

 Ogeysii	Ogeysii Guddiga 3 maalmood shaqo gudahood ka dib markaad ogaato eedaynta.
 Baar	<ul style="list-style-type: none">• Baaritaan ku samee eedeeyn• U sheeg Guddiga cidda samaynaysa baaritaanka• Maaree khatarta carruurta..
 Cusboonaysii	Sii Guddiga xog faahfaahsan 30 maalmood kaalandar gudahood ka dib markaad ka warheshay eedeeynta.
 Natiijooyinka	U sheeg Guddiga wixii ku saabsan natiijada baaritaanka, waxa xiga waxay haya'ddu sameyn doonto iyo sababta.

Waa dembi ciqaabeed in qof madax u ah hay'ad aanu u hoggaansamin shuruucda wargalinta ee **3 maalmood oo ganacsi iyo 30 maalmood oo kaalandar**.

Wixii macluumaad dheeraad ah oo ku saabsan masuuliyadka madaxa hay'ada waxaa laga heli karaa website-kayaga.

Xaggee caawimaad laga helaa

Waxaad la xiriiri kartaa Guddiga adigoo:

- Telefoonka: (03) 8601 5281
- Email: contact@ccyp.vic.gov.au

Waxa kale oo aad ka heli kartaa macluumaad dheeraad ah oo ku saabsan website-ka Guddiga:
www.cyp.vic.gov.au

Haddii aad u baahan tahay turjumaan, fadlan wac Adeega Turjumaada Qoraalka iyo Af-celinta 13
14 50 oo weydii inay la xiriiraan Guddiga Carruurta iyo Dadka Dhalinyarada ah 03 8601 5281.

